

Macluumaad ku saabsan hawl-socod siinta xogta

“Diiwaan-gelinta dukumentiga aqoonsiga deegaanka (IDR)”

sida waafaqsan qodobka 13 iyo 14 ee Xeerka Ilaalinta Xogta Guud (DSGVO)

Magaca iyo faah-faahinada xiriirka ee ilaaliyaha:

Bundesamt für Fremdenwesen und Asyl (Xafiiska Socdaalka iyo Magan-galyada ee Federaalka)

Modecenterstraße 22, 1030 Wien

Teleefoonka: +43- 59 133 98 7004

Faakiska: +43- 59 133 98 7399

li-maylka: BFA-Einlaufstelle@bmi.gv.at

Faah-faahinada xiriirka ee shaqaalaha ilaalinta xogta:

Teleefoonka: +43- 59 133 98 0

li-maylka: BFA-Datenschutzbeauftragter@bmi.gv.at

Ujeeddooyinka loogu talagalay hawl-socod siinta midaas oo loogu danleeyahay xogta shakhsiyeed:

Diiwaanada deegaanka ee loogu talagalay soo saarida kaararka Aqoonsiga sidoo kale diiwaanka lagu qorayo xogta kaarka Aqoonsiga

Aasaaska sharciyeed ee loogu talagalay hawl-socod siinta:

Qodobka 3, 16, 22a ee Qaanuunka Baasaboorka, Joornaalka Sharciga Federaalka Lambarka. 839/1992 sida loo saxay, ee xiriirka la leh Xeerka Fullinta Qaanuunka Baasaboorka (PassG-DV), Joornaalka Sharciga Federaalka Lambarka II. 223/2006 sida loo saxay, ee xiriirka la leh Qaraarka Baasaboorka (PassV), Joornaalka Sharciga Federaalka Lambarka. 861/1995 sida loo saxay, ee xiriirka la leh Qaanuunka Dowlada-E (E-GovG), Joornaalka Sharciga Federaalka Lambarka I. 10/2004 sida loo saxay, ee xiriirka la leh Xeerka Diiwaan-gelinta SourcePIN (StZReg), Joornaalka Sharciga Federaalka Lambarka II. 57/2005 sida loo saxay

Muddada la keydin doono xogta shakhsiyeed:

Hawl-socod siinta xiriirka la leh xogta waxaa la tiri doonaa intiiba aanan loo baahnin, si kastaba ugu dambays 10 sanno kadib marka la gudbiyo go'aanka ku xigta soo saarida baasaboorka. Xogta ka ahaata dhinaca shahaadooyinka la bixiyay waxaa la tiri doonaa hal sanno kadib marka la buriyo kaarka aqoonsiga, sida ku xigta baasaboorada - ugu dambays kadib 6 sanno kadib marka uu baasaboorku dhaco. Xogta codsiga waxaa la tiri doonaa marka si sax ah looga baxo ama si sharci ah loo diido in la hakiyo, sharaxaada ku saabsan hawl-socod siinta socota kadib marka hakinta sharciga ahi ay ka dhammaato hawl-socod siintaasi. Xogta kaarka aqoonsiga iyo baasaboorka waxaa la tiri doonaa hal sanno kadib marka la buriyo, si kastaba muddo aanan dib uga dhicin 6 sanno kadib marka ay dhacdo muddada saxda ah ee ugu dambaysa. Xogta luntay ama baasaboorada shisheeye waxaa la tiri doonaa 6 sanno kadib dhicitaanka muddadooda u dambaysay; xogta luntay ama bedelka baasaboorka shisheeye waxaa la tiri doonaa hal sanno kadib marka ay dhacdo. Xogta waafaqsan qodobka 22a, qaybta 1, maadada k ee Qaanuunka Baasaboorka waa in la tiraa muddo aanan dib uga dhicin labbo bilood kadib marka dukumentigaasi la diro (qodobka 3, qaybta 6 ee Qaanuunka Baasaboorka) oona dib uga dhicin afar bilood kadib marka loo diro

Wasaarada Federaalka Yurub ee ku lug leh, Isdhexgalka iyo Arimaha Dibada, haddii kale leh ka bixid sax ah ku xigta diidista hakinta sharciga ah ama diidista codsiga.

Qaybaha dadka qaatayaasha ah ee qaata xogta shakhsiyeed:

Maamulo deegaan baasaboora u qalma oo kale; wakaalado ammaan; Maamulka Diiwaangalinta SourcePIN ee ah gudaha shuruudaha lagu sheegay Qaanuunka Dowlada-E

Hawl-fuliyayaasha: IBM Österreich - Internationale Büromaschinen Gesellschaft m.b.H.; Microsoft Österreich GmbH; Bundesrechenzentrum GmbH.; Österreichischen Staatsdruckerei GmbH

Xuquuqaha qofka xogta:

Xaqa loogu soo gudbiyo cabasho Maamulka Ilaalinta Xogta Austariyan (1030 Wien, Barichgasse 40-42, teleefoonka +43 1 52 152-0, ii-maylka dsb@dsb.gv.at) waxaa lagu dabakhayaa sida waafaqsan qodobka 24, cutubka 1 ee Qaanuunka Ilaalinta Xogta (DSG).

Xaqa gelida waxaa lagu qoray gudaha qodobka 15 ee DSGVO.

Xaqa sixida waxaa lagu qoray gudaha qodobka 16 ee DSGVO.

Xaqa tirida ('xaq loo leeyahay in la iska iloobo') waxaa lagu qoray qodobka 17 ee DSGVO.

Midna ma ahan wax xaq ah oo lagu diido sida waafaqsan qodobka 21 DSGVO ama wax xaq oo lagu xanibayo hawl-socod siinta xogta sida waafaqsan qodobka 18 ee DSGVO kuwo lagu dabakhi karo.